

Hennepin Healthcare System, Inc.
Xogta Kooban oo ku saabsan Luuqada Fudud ee Xeerka Caawimaada
Dhaqaalaha (PLS)

Hennepin Healthcare System, Inc.'s (HHS) waxay ku dadadaalaysaa inay siiso dhammaan bukaanadeena daryeelka heerka ugu sareeya, ayadoon laga eegayn awooda dhiibista lacagta.

Fadlan noo sheeg haddii aadan dhiibi karin qarashka buuxa ee daryeelkaaga - waan ku caawin karnaa. La taliyaheena dhaqaalaha ayaa kaa caawin kara buuxinta codsiyada barnaamijyada kaladuwan ee bulshada iyo dawladu maal gashaan si ay kuu siiyaan caawimaad dhaqaale, iyo sidoo kale kuu qeexaaya xeerkeena caawimaada Dhaqaalaha iyo doorkhyada qorshaha qarash bixinta.

Bukaannada leh caymiska yar ama kuwa aan caymisba lahayn daawayna ka hela HHS ayaa u qalmi kara caawimaad dhaqaale oo lagu bixiyo Xeerka Caawimaada Dhaqaalaha ee HHS. Caqabada dhaqaalaha ayaa lagu qiimeeyaa hadba xaalada markaas jirta. Adeegyada isqurxinta, ikhtiyaariga ah, tijaabada ah, iyo adeegyada ayaan u qalmi karin qiimo dhimista caawimaada Dhaqaalaha. Adeegyada aan biilkooda lagu codsan HHS uma qalmaan barnaamijkaan.

Qofkee u qalma caawimaad dhaqaale waa maxayse shuruuduhu?

Barnaamijyada Caawimaada Dhaqaaluhu wuxuu ka caawiyaa dadka danyarta ah, dadka aan caymiska lahayn, ama bukaannada caymisku uusan ku filnayn ee u baahan in laga cawiyo bixinta dhammaan ama qayb kamid ah qarashka daryeelka Caafimaadka. U qalmida caawimaada Dhaqaalaha ayaa lagu saleeyaa dakhliga guud ee bukaanka (ama qoyska bukaanka haddii ay canshuurta dad kale isla buuxiyaan) marka loo eego Tilmaamaha Fakhriga ee Federaalka. Xaalada degdega ah ama daryeelka Caafimaad ahaan Muhiimka ah, qofka u qalma lagama qaadi karo wax ka badan cadadka Caadiyan Laga Qaado shaqsiyaadka caymiska leh. Xeerka Caawimaada Dhaqaalaha ayaa laga heli karaa www.hennepinhealthcare.org.

Sida loo Codsado?

Bukaannada codsanaaya caawimaada Dhaqaalaha ee daryeelkooda caafimaadka ayaa buuxinaaya codsiga si ay u codsadaan waana inay buuxiyaan shuruudaha u qalmida si ay u helaan caawimaada. Bukaannada ayaa u baahan doona inay ka jawaabaan su'aalo ay ku jiraan baaxada qoyska, shaqada, dakhliga, hantida, bangiga, iyo caymiska hadda waxayna u baahan karaan inay diraan dukumiinti taageeraaya.

- Si aad u hesho caawimaad ama su'aalo ku saabsan xeerka caawimaada Dhaqaalaha, sida loo codsado, fadlan wac 1-800-495-4915, ama aad gasho webseedka assistance.changehealthcare.com.
- La tasho khabiir dhaqaale oo jooga goobaha soo socda ee HHS:

HHS CSC Building— 715 South 8th Street, 1st floor, Minneapolis, MN

Whittier Clinic—2810 Nicollet Ave, Minneapolis, MN

Brooklyn Park Clinic—7650 Zane Avenue North, Brooklyn Park, MN

Haddii aad u baahan tahay caawimaad dheeraad ah waxaad booqan kartaa sidoo kale:

<https://www.hennepinhealthcare.org/billing/financial-help>